

DHS-5294-ENG 10-19

[Link to the English copy](#)



## **Qaab Dhismeedka Uqlamida iyo Aqoonta tobabarayaasha Minnesota**

Oktober 2019

# Qaab-dhismeedka **Kartida** iyo Aqoonta **Tababarayaasha Minnesota**

---

## Mahadnaq

Shaqaalaha Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota way ka mahadcelinayaan fikradaha iyo wax ku biirinta daneeyayaashayada lagu maalgeliyay horumarinta tababarka carruurnimada hore iyo shaqada da'da dugsiga ee Minnesota, oo ay ku jiraan:

Xubnaha guddiyadan la-talinta:

- Guddiga La-talinta Taageerada Tababaraha iyo khabiirka RBPD-da
- Marinka kooxda-shaqo – Child Care Aware ee Minnesota (CCAMN)
- Acheive - Guddiga La-talinta ee Xarunta Horumarinta Xirfadlayaasha

Minnesota

Ka qaybgalayaasha Shir-madaxeedyada Tababarayaasha CCAMN ee 2017 iyo 2018

Xarunta Jaamacadda Minnesota ee Waxbarashada Hore iyo Horumarinta iyo kooxda mas'uulka ka ah Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee Khabiirada Horumarinta Xirfadeed ee ku Saleysan Xiriirka ee Minnesota

Karen Fogolin iyo Cory Woosley ee Child Care Aware of Minnesota

Jamie Bonczyk

Bonita Lacey

Debbie Hewitt, Waaxda Waxbarashada ee Minnesota, iyo kooxda ka mas'uulka ah xoogga shaqo ee carruurnimada hore ee Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida

## Shaxda Tasmada Nuxurka (corrected it to this)

Qaab dhismeedka <b>Aqoonta iyo Kartida Tababarayaasha Minnesota</b>	1
<b>Mahadnaq</b>	2
<b>Shaxda Tasmada Nuxurka</b>	3
<b>Horudhac</b>	4
<b>Tilmaamaha la raacayo</b>	5
<b>Isticmaalka qaab-dhismeedkan</b>	6
<b>Ficillada Tababarayaasha (dispostions)</b>	7
<b>Kartida tababarayaasha</b>	9
<b>Kartida tababaraha</b>	11
<b>Nuxurka Aagga I: Dhaqamada Anshaxa iyo Xirfadlenimada</b>	11
<b>Nuxurka Aagga II: Mabaadi'da Waxbarashada Dadka waaweyn</b>	16
<b>Nuxurka Aagga III: Jawiga Deegaanka Waxbarasho</b>	19
<b>Nuxurka Aagga IV: Fududeynta Waxbarashada</b>	22
<b>Nuxurka Aagga V: Qiimaynta iyo Qaddarinta Tababarka</b>	28
<b>Nuxurka Aagga VI: Naqshadaynta Tilmaamaha</b>	29
<b>Nuxurka Aagga VII: Tabarada Tiknoolajiyada ku saleysan</b>	33
<b>Eray bixinta Muhiimka ah</b>	38
<b>Tixraacyo</b>	39
<b>Dukumeentiyada lagu tixraacay kartida (Competencies)</b>	40

## Hordhac

*Evelyn, macalimad dugsiga barbaarinta, ayaa xaadirtta sannad walba tababarro kala duwan oo ku saabsan gudaha shaqada ee looga baahan yahay shaqadeeda. Toddobaadkii hore waxay billawday tababarro taxane ah oo diiradda lagu saaray dhisidda xirfadaha akhris-qoraalka carruurta. Intii lagu jiray xiisaddii fiidnimada ee koobaad, Evelyn waxa ay wax ka baratay muhiimada ay leedahay siinta caruurta marinka akhris-qoraalka kala duwan oo heer sare ah. Fasalka dabadii, Evelyn waxa ay isticmaashay liis la siiyay oo ay ku qiimeyneysay maktabadda fasalkeeda. Evelyn waxay go'aamisay in maktabadeedu ay leedahay awoodo badan, laakiin ay xidhmada buugaagta ka maqan tahay kala duwanaansho. Waxa ay isticmaashay mid ka mid ah qoraallada fadhiga laga qeybiyay markii ay booqatay maktabadeeda deegaanka si ay u soo qaado buugaag cusub oo toddobaas xiga loo isticmaalo. Fadhiga xiga ee fasalka tababarka Evelyn aad bay ugu faraxsanayd inay ka warbixiso inta wakhti dheeriga ah oo carruurta ku bixinayeen maktabadda iyo xamaasadda akhriska buugaagta ee ku soo kordhayay fasalkeeda.*

Evelyn waa tusaale bare dugsiga barbaarinta ama daryeelka da'da dugsiga taas oo ka faa'iideysanaysa tababarka. Laakiin, faa'iidooyinka dhabta ah ee tababarkeedu wuxuu uga gudubsan yahay Evelyn caruurta iyo qoysaska ay ugu adeegto goobaha caruurnimada hore iyo daryeelka da'da dugsiga inta shaqadeeda oo dhan.

Xirfadlayaasha caruurnimada hore ayaa mudo dheer ku tiirsanaa tababaro si loo xaqiijiyo badqabka iyo caafimaadka ee mashruuca xanaanada caruurta iyo dhisida xannaano iyo wax barasho tayo leh ayadoo la isticmaalayo dhaqamo cadeyntooda hubo. [Institute of Medicine and National Research Council, 2015] Si kastaba ha ahaate, tobabarku waxa uu wax tarayaa markii ay sameyaan tabarayaal aad u diyaarsan ayadoo la isticmaalayo habraacyo la hubo oo wax ku ool ah. [Zaslow & Martinez-Beck, 2006]

2007-dii, Waaxda Adeegga Aadanaha (Department of Human Services (DHS)) ayaa waxa ay sharci dajiyayaasha uga baahdeen in ay howlgeliso habraacyo horumarineed ee xirfadlayaasha ee caruurnimada hore iyo xoogga-shaqo ee daryeelka da'da dugsiga. Tan waxaa ku jira horumarinta nuxurka tababarka, habka oggolaanshaha tababarayaasha, nidaamka dabagalka diiwaanada tababarka, iyo qorshe la isku dubaridan oo la heli karo oo tababarada lagu bixiyo. Minnesota waxay isticmaashaa Develop, hab xogta oo ku salaysan shabakad, si ay hawshan u fuliso. 2015kii, waaxda waxa ay kusoo dartay adeeg taageero tobabarayaal dheeriya ee habraaca kobcinta horumarinta si loo xaqiijiyo tayada tobabarada la sameynayo. Ilaa halkan, hawlaha diyaarinta iyo taageeridda tababarayaasha waxa la fuliyay iyada oo aan laga faa'iidayaan qaab-dhismeed karti-xirfadeed oo tababarayaasha oo lagu dhisi karo tababarida tababarayaasha, kormeerida tababarayaasha ama qiimaynta tababarayaasha.

Tababrayaasha Minnesota ee caruurnimada hore iyo daryeelka da'da dugsiga waa koox xirfadlayaal kala duwan kuwaas oo door firfircoon oo mug leh ka ciyaara horumarinta xirfadeed ee macalimiinta, adeeg-bixiyayaasha daryeelka carruurta, adeeg-bixiyayaasha qoyska ee daryeelka carruurta, agaasimayaasha xarumaha, maamuleyaasha barnaamijka, iyo kuwa kale.

Tobabarayaasha ayaa laga yaaba in ay isticmaalahan ciwaanno kala duwan oo ay ku jiraan macalinka dadka waaweyn (adult educator), fududeeyaha, khabiirka horumarinta xirfadda, iyo kuwa kale. Inkasta oo Minnesota ay leedahay nidaamka ansixinta tababaraha kaas oo dejinaya filashooyinka aasaasiga ah ee shahaadooyinka tababaraha, sidoo kale waxaa run ah in tobabarayaasha ay ka kala yimaadaan bulshooyin kala duwan oo leh qibarado, aqoon iyo xirfado badan oo kala duwan.

Qaab dhismeedkan waxaa loo qorsheeyay in lagu taageero shaqada barayaasha tababara caruurnimada hore iyo xirfadlayaasha daryeelka da'da dugsiga ee Minnesota. Dukumiintigan waxaa ku jira:

- Mabaadi'da hagidda ee horumarinta xirfadeed (tababarka)
- Isticmaalka Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida
- Ficillada tababarayaasha
- Erey-bixinnada muhiimka ah

- Tixraacyo

Si la mid ah qaab-dhismeedkan, Minnesota waxay sidoo kale leedahay karti-xirfadeedyo loogu talagalay Horumarinta Xirfadlaha Ku-saleysan Xiriirka (RBP) kuwaas oo bixiya tababarid, la-talin, iyo hagidda carruurnimada hore iyo xirfadlayaasha daryeelka da'da dugsiyada ee Minnesota. Xirfadahaan waxaa laga heli karaa:

<https://edocs.dhs.state.mn.us/lfsrver/Public/DHS-7586-ENG>.

## Tilmaamaha la raacayo

Mabaadi'da soo socota ayaa hagta oo jiheeya qaab-dhismeedkan kartida:

- Waxa ay tababaryaashu sameeyaan iyo sida ay u sameeyaan ayaa si toos ah u saamayn ugu leh koboca xirfadeed ee dadka waaweyn ee kale -la hawl galayaashooda waxbarashada - taas oo iyaduna saameynaysa carruurta.
- Tababarayaashu waxay taageeraan xirfad-yaqaanimada joogtada ah ee goobta iyadoo loo marayo nuxurka ay barayaan iyo inay noqdaan kuwo lagu daydo ee dhaqanka xirfadda iyo dhaqanka anshaxa suubban.
- Dhammaan bartayaasha waawayni waxa ay muujiyaan awood ayagoo ula yimaada aqoon badan shaqadooda.
- Dhammaan bartayaasha waawayni ayaa horumarin kara waxtarkooda.
- Bartayaasha waawayni waxa ay ka soo kala jeedaan bulshooyin kala duwan oo leh awoodo kala duwan, habraacyo wax barasho, khibrado iyo aragtiyo kale duwan. Tababarayaasha ayaa sidoo kale dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba way kala duwan yihiin waana in laga fisho, loo dabbaaldego, lana qorsheeyo, lagana jawaab eliyo kala duwanaanshaha.
- Qofka shaqsiga weyn ahi sida uu u wajaho isbaddelka iyo waxa ay ka aaminsan yahay shaqadiisa ayaa sameyn ku leh sida uu u fududeeyo, ula shaqeeyo dadka kale, uguna dhaqmaan waxee bardeen.
- Tababarayaasha ayaa ka mas'uul ah in ay abuuraan ilaaliyaanna jawi waxbarasho oo ay bartayaasha waawayni ku dareemaan ku hawlanaan, ammaan, iyo in lagu taagerayo wax barashada.
- Xogta lagu soo ururiyo u kuurgalka, qaddarinta, iyo qiimayntu waxay siisay aasaaska guud ee u dabaaldega iyo koboca.
- Tabarayaahu waxay taageeraan waxbarashada dadka waaweyn iyagoo la wadaagaya nuxur cusub oo ku daraya khibradaha, baahiyaha, iyo aragtida tababartayaasha fadhi kasta.
- Tababarayaashu waxay diiradda saaraan awoodda ka qaybgalayaashooda iyadoo maanka lagu hayo sidoo kale ilaalinta tayada gudaha daryeelka iyo waxbarashada carruurta yaryar.
- Tababarayaasha kuma eko taagerada kaliya sidoo kale waxa ay ardayda ku xujeyaan in ay halista u bareraan, ay isku dayaan wax cusub iyo in ay dusha saartaan mas'uuliyado cusub.
- Tababarka isticmaala habab kala duwan (fool-ka-fool, khadka tooska ah ee xilliyaysan synchronous iyo ka aan xilliyaysnayn asynchronous, isku-dhafka, iwm.) iyo qaababka (shirar, aqoon-is-weydaarsiyo, taxane, iska-u-barasho, iwm.) waxay bixiyaan fursado gaar ah koboca shakhsiga iyo barnaamijkaba. Waxaa habboon in la geliyo waqti, lacag, iyo fiiro gaar ah si loo go'aamiyo sida, iyo nidaamyada iyo qaababka ugu guulaha badan, ee xaaladahee, iyo ka qaybgalayaashee.
- Dhaqanka barnaamijka ayaa laga yaabaa inuu saameyn ku yeesho waxtarka tababarka, ama si toogan ama si taban oo qaybgalayaasha. Aqoonsiga iyo fiiro gaar ah u yeelashada arrimaha saameyn kara u gudbinta xirfadaha tababarka xagga goobta shaqada ayaa muhiim u ah gaaritaanka guusha.

## Isticmaalka qaab-dhismeedkan

Aqoonsiga dabeecadaha, aqoonta, iyo kartida tababarayaashu waxay u horseedi kartaa shakhsi, barnaamij, iyo isbeddel siyaasadeed oo taageera bixinta tababar loo dhan yahay. Intaa waxaa dheer, luqadda iyo filashooyinka muuqdaa waxay kor u qaadaan taageerada tababaraha si ka wanaagsan oo joogto ah. Isticmaalka suurtagalka ah ee Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee tababarayaasha waxaa ka mid ah:

### Tababarayaasha:

- Heerar ay ku cad yihiin walxaha u muhiimka ah shaqooyinka maalinle ee tobabaraha.
- Agab isqiimeyn nafsi, dib umilicsi iyo deginta hiigsiyo waxbarasho iyo waxqad ee shaqsi..
- Habraacyo marka wax la barayo ama latoba barayo shaqaalaha ku cusub booska tobabare.
- Qaab dhismeed loo isticmaalo waxbarashada bulshooyinka iyo dhaqamada tobabarayaasha.

### Ururada iyo barnaamijyada:

- Habraac horumarinta heeshiisyada iyo qeexida shaqada tobabaraha, sidoo kale xulashada shaqadoonka buuxinaya boosaska tobabarayaasha.
- Agab lagu diyaarin karo horumarinta xirfadle iyo wargelinta qiimeynta wax qabad..
- Habraac lagu xalinayo sameynta taagerida mashruuc, howl socodka , iyo habraacyada si loogu horumariyo howlaha tobabarka.

### Adeeg bixiyaasha deynta qaata (credit) iyo kuwaan qaadan (non-credit) ee horumarinta xirfadle:

- Agab lagu garan karo warbixinta jadwalka waxbarasho iyo shaqada casharada si loogu adkeyo horumarin (tobabaraha)..
- Qaab dhismeed lagu wajahayo, lagu hagayo , ama lagu qiimeynayo dadaalka horumarinta xirfadle ee guud ahaan qeybta kala duwan ee taqasusayaasha tobabarada.
- Qorsheyn kara ama dib u eegis ku sameyn kara qaababka heer ka gaarid ee shaqo..

### Shabakadha maxaliga ah iyo gobolka:

- Agab lagu hormarinaayo joogteynta iyo uqalmida tobabarka ee dhamaan qeybaha kala duwan iyo mashruucyada..
- Qaab dhismeed lagu qeexayo laguna hormarinaayo shaqada horumarin xirfadle sidii Indho indheye: (indho indheynta, tobabarida, cashar siinta ama tobabarka ) waxbarashada caruurta yar iyo ardayda iskuulka gaaray iyo kashaqeynta horumarin dheeriya ee waxbarashada caruurta iyo habraaca shaqo ee kuwa horumarinta xirfadle ee kuwa waqtiga iskuulka gaaray.
- Agab lagu horumarinayo - tayada sare ee waxbarashada caruurta yar iyo caruurta gaaray xanaanada da'da iskuulka sidoo kalena lagu horumarinayo dadaalada magdhaw iyo xaaladaha shaqada ee macalimiinta caruurta yar iyo kuwa waqtiga iskuulka gaaray.

### Cilmi baarayaasha iyo qiimeyayaasha barnaamijka:

- Qalab lagu wargeliyo oo kor loogu qaado cilmi-baarista ku saabsan dhaqanka caddaynta ku salaysan ee carruurnimada hore iyo horumarinta xirfadeed ee daryeelka da'dadugsiya.

## Ficillada Tababarayaasha (dispositions)

*Dayo, oo ah adeeg-bixiye daryeelka carruurta ah, ayaa iska diiwaan galiyay dhacdooyin tababarro taxane ah oo wax ka qabanaya filashooyinka korriinka ee carruurta yaryar. Habeenkii ugu horreeyay, tababare Maria ayaa albaabka ku salaantay Dayu oo is bartay. Dhawr daqiiqo ka dib, Maria waxay ku biirtay Dayo iyo dhawr kale oo adeeg-bixiyeyaal ah oo miiskooda. Maria ayaa waydiisay, "Maxaa idin keenay tababarkan?" Maria si taxadar leh ayay u dhegaysataa oo wayddiisaa su'aalo dheeraad ah iyadoo Dayo iyo asxaabteeda ay wadaagayaan dareenkooda iyo farxadda la shaqaynta carruurta maalin kasta. Dayo waxay ogaatay dulqaadka iyo danaynta Maria marka qof kastaa hadlayo. Markii ay soo dhawaatay waqtigii loo qoondeeyay tababarka, Maria waxay tiri, "aad ayaan ugu faraxsanahay inaan awooday inaan kula hadlo, waxaan hayaa xoogaa fikrado cusub oo ku saabsan waxyaabo aan ku kordhin karno tababarkeena caawa." Dayo waxa ay la dhacsan tahay in tababaruhu uu hagaajinayo qorshayaasheeda si ay u daboolo baahiyahooda iyo danahooda.*

Marka lagu daro cilmiga iyo xirfadaha lagusoo bandhigay qaab dhismeedkan, qaababka wax yaabaha qaar loo qorsheyay ayaa loo arkaa in ay muhiim u tahay barayaasha ama shaqaalaha ka shaqeya kobcinta dadka kale (haddee tahay caruur ama dadka waaweyn). Sheekada kor ku xusan, tobaraha Dayo ayaa muujinaya dareen sida u kuur gelid ogaansho iyo u furfurnaansho fikradaha dadka kale.

**Waa maxay ficilladu?(dispositions)?** Waxaa lagu qeexa in ay tahay, "u xaglinta ama u janjeeridda in la rumaysto ama loo dhaqmo siyaabo gaar ah." [Dottin, 2010; Teven, 2007] Katz 1995, hogaamiye waxbarashada caruurta yar yar iyo faallada tobararka macalimiinta ee "rabitaanku waxa uu ka kooban yahay dabciyo maskaxda ee maahan dabciyo iska samey ah." [Ross-Vosels & Moss, 2007] Cilmi baare waqti dheer ee rabitaanka macalimiinta iyo in qiimeyntoodu ku qeexday rabitaanka sidii "in uu la mid yahay waxyaabaha uu aaminsan yahay xirfadlaha ama habraacyada uu qiimeyo, laakiin waa ay ka badan tahay intaas. Rabitaanku intaa waa ka gacan dheer yahay oo waxa qeyb ka yahay habka uu u dhaqmayo xirfadlaha iyo waxa uu aaminsan yahay iyo ficilada dabeecadaha ay muujinayaan macmalimiinta inta lagu jiro iyo banaanka fasalkaba. [Ross-Voseles & Moss, 2007]

**Maxay muhiim u yihiin?** Rabitaanku waxa uu sameyn ku leeyahay sida uu qofku ula dhaqmo dadka kale. Qaab-dhismeedka ayaa ku bar bar sheegaya rabitaanka, waxbarashada iyo xirfadaha, sababto ah rabitaanku waxa uu sameyn ku leeyahay sida iyo waxa ay tobarayaasha ay ogaan karaan, sida ay ugu dhawaanayaan dadka kale, iyo sida ay u arkaan caqabadahaka hor yimaada. Rabitaanada ay yihiin fikrado isku xig xiga ayaa loo arki karaa fikirka shaqsi ama qolo kale, dareen u jeedo, u nuglaansho, u furfurnaan waxa dhici karaa, iyo u janjeerid isqiimeynta fikirka shaqsi. Iyadoo ay jiraan doodo ku saabsan hababka gaarka ah ee lagu ogaan karo, ayaa waxaa jira waxyaabo isdaba joog ah oo ku jira suugaanta iyo mawduucyada caadiga ah ee ka soo dhex baxa tababarayaasha tababarka.

**Waa kuwee dabeecadaha muhiimka u ah tababarayaasha?** Qaar badan oo kamida rabitaanada hoose ayaa laga soo qaatay Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Uqalmida Xirfadlayaasha Caruurta yar yar ee Minnesota (Minnesota's Knowledge and Competency Framework for Early Childhood Professionals). [2014, p. 10] Kuwa rabitaanada (dispositions) matalaya ayaa isla gartay mawduucyada guud ayadoo wada hadal dib u eegis loogu sameyay dhaqan ahaan, deegaan ahaan iyo mashruuc ahaan qoomiyadaha kala duwan ee macalimiinta Minnesota. Dokumentigan tababarayaasha sidoo kale waxaa ka mid ah xulashooyinka (dispositions) helay iyada oo loo marayo laba dhacdooyinka is-dhexgal, Shirarka Tababaraha CCAMN dayrta 2017 iyo 2018. Xulashoyinka (dispositions) ayaa lagu daray sababtoo ah waxay matalaan waayo-aragnimada dhabta ah ee tababarayaasha Minnesota. Liiska ayaa sidoo kale ka tarjumaya xulashoyinka (dispositions) la jaanqaadaya suugaanta ku saabsan tababarka iyo waxtarka tababaraha.

### Ujeedo iyo aragti macno leh:

- ☐ Dareenka Daacadnimada: Mas'uul, lagu kalsoonaan karo, Daacadnimo iyo la dabagal



- ❑ Taxadar leh: Waafaqsan federaalka, gobolka iyo shuruucda mashruuca iyo sharciyada anshaxa la xiriira ilaalinta sirta shaqsi iyo t an guud
- ❑ Hiigsiga: Dhisaayo, hormarinayo habraaca waxbarashada iyo dhigida casharada ayadoo laga go'aan qaadanayo xuduudaha shaqsiga iyo xirfadlaha; muujinaya ka daacad ahaansho
- ❑ ka go'naansho waxbarasho iyo kobac (nafsiyan ah iyo midka dadka kaleba)
- ❑ Qiimeya xogta (indho indheynta, sheekooyinka, qiimeynta sharciga) sidii wado loo marayo fahanka, ku dhaqmida , iyo taageerida dhaqamo wax ku oolka ah.
- ❑ Waxtarka: Leh rajooyin sare iyo midka dadka kaleba; ay ka muuqato is-hagid shaqsiyan ah iyo kalsooni; ku dhiiro gelinaya dadka kale in ay muujiyaan xirfadooda iyo waxee ku fiican yihiin.

**Hababka la dhaanka dadka kale:** (Shasiga; xoog saarid ardayda waaweyn; **dareenka-bulshonimo** iyo wada xiriirida), oo ay ku jirto:

- ☐ Dareen u nuglaansho
- ☐ Niyad sami dadka kale ah (ku raaxeysto la shaqeynta dadka kale; rajo wanaagsan (qof wax wanaagsan rajeyo mar walbo), aaminsan awooda waxbarasho iyo dhameystirka shaqo cusub)
- ☐ Qiimeya oo ka mahad celiya kala duwanaashaha; aanan dadka canbaareyn
- ☐ Dhaqan ahaan dagan; Ku qanacsan kana faa'iideysta kala duwanashaha; qimaya fikradaha dadka kale; ka war qabo, wax ka qabto oo hoos u dhigo eexidiisa.
- ☐ Dareen jaceyl iyo niyad ahana la heli karo
- ☐ Awooda in uu shactireyo
- ☐ niyad ahaan jooga, dhago wax dhagesta leh, nafta dib ugu laabto
- ☐ Xushmad badan: Xushmad u muujiya baahida iyo qibradaha dadka kale
- ☐ Isku dhafa: Qiimeya fikradaha kala duwan, kuna dara cashar bixinta
- ☐ Lalashaqeyn karo: Isku arka in uu waxna barayo waxna baranayo; aanan isku arkin in uu qabiir wax soo jeedinaya yahay
- ☐ Cod kar ah awoodana in uu dibada aado: Diyaar u ah in uu kala qeyb qaato una warceliyo dhalinta, xubnaha, maamulada , iyo kuwa kale.
- ☐ Ku qanacsan isbadalka: Isbadali kara diyaarna u ah aqbalida isbaal qorshe sameysan
- ☐ Ku qanacsan una diyaar ah in uu naftiisa iyo dadka kaleba kula xisaabtamo isbadalada.

### **Aragtida Nafsi**

- ☐ Dagan, daacadna ah
- ☐ **Furfuran** iyo qof awooda in uu dibada aado, looso dhawaan karo, warkiisana cad yahay
- ☐ Dulqaad leh, go'aana leh
- ☐ Isku filan, xamaasadna leh

**Qaababka fikradaha, hawlaha ama arrimaha:** Leh awood qiimeyn si dhaw, canbaareyn, iyo weydiin su'aallo. tobabarayaasha ma aqbalayaan qiimeynta xaalada muuqaal ee laakiin waxa ay isticmaalyaan xirfado fikir - lagu qiimeyo, lagu kala dhig dhigo, laguna ogaanayo. Is-qiimeynta shaqsi iyo dib isku raaca ayaa ku kala qeybinaya dadka kooxo rabitaan (dispositions), oo ay ka mid tahay:

- ☐ **Indho indheye:** Qaada habraacyo lagu qaadayo warbixinta (dhageesi iyo daawasho) si u jeedo ku dheehan tahay; ku shaqeynayo ujeedo ogaansho waxa ay dadku leeyihiin ama sameynayaan, sidoo kale iyo walxaha ku hareereysan iyo marxalada lagu jiro; si niyadana u aruurinaya una diwaan gelinaya waxuu indho indheyo; indho indheynta la xiriirinaya dareen rabitaan ogaansho iyo in uu qofku awoodo in uu dhanka kale ee dadka uu wax ka fiirin karo loona saadalin karo dadka kale.
- ☐ **Milicsi:** Waxay si joogto ah waqti u qaata in la qiimeeyo waxtarka tababarka marka la eego himilooyinka ballaaran ee tababarka ama horumarinta xirfadaha; waxay kobcineysaa dib-u-eegista tababarayaasha; waxay ka tarjumeysaa koboca iyo isla xisaabtanka.
- ☐ **Joogtayn:** Wuxuu muujiyaa rabitaanka inuu raadiyo xalalka dhibaatooyinka ama su'aalaha; ururiyaa xogta la xidhiidha oo si joogto ah u raadiyo hagaajinta xaaladaha ama meelaha baahida; halis-u-bareere.
- ☐ **Jecel inuu wax ogaado/qof su'aallo badan:** Jecel in uu kafikiro, su'aallo weydiyo, qiimeyo fursadaha furan, qiimeya oona labada dhinac ka fiiriya arinta jirta, garan kara in uu dhaqankiisa iyo waxuu aaminsan yahay qaldan yihiin.
- ☐ **Isku dhafa:** Si ula kaca u raadiya fahanka dad iyo fikrado kala duwan.

## **Kartida aqoonta tababarayaasha**

Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida Tababaraha waxa uu isticmaalaa luuqad guud oo loogu talagalay in lagu dabaqo xaalado kala duwan halkaas oo tababarku ka dhaco daryeelka caruurnimada hore iyo goobaha da'da dugsiga. Kartida aqoontu waxay qeexaysaa xirfado gaar ah ama dabeecado tababarayaasha laga filayo inay muujiyaan.

Uqalmida tobabare ayaa loo kala qeybiyaa todobo qeybood sida ku qeexan qeybaha soo socda. Shanta qeybood ee ugu horeyso ayee quseysa inta badan dadka, ama dhamaantood, tobabarayaasha. Warbixinta qeybaha ayaa xooga saareysa uqalmida lala xiriirinaayo qabashada iyo fududeynta tobabarka. Warbixinta VI ayaa gooni u ah qorsheynta iyo horumarita agabka tobabarka. Tobabarayaasha ayaa xooga saara aasaaska qabashada diyaarinta jadwalka tobabarka waa in uu xooga saara Qeybta Warbixinta I - V laakiin laga yaaba in uqalmida Qeybta Warbixinta VI u arko kaalmo fahanka xirfadaha ku saabsaan sameynta qorshe tobabaraha.

Qeybta Warbixinta VII ayaa xooga saareysa uqalmida lala xiriirinaayo waxbarashada ku saleysan tiknoolajiyada (online-ka ah). Dhamaan tobabarayaasha ma wada doortaan in ay isticmaalaan habka online-ka ah ama tiknoolajiyada ku saleysan online ka. Sidoo kale, dhamaan warbixinta tobabarka uma wada haboona ku qabashada hab online ah. In badan xirfadaha la xiriirinaayo waji ka wajiga, ama tobabarada fasalka lagu qabto, ayaa sidoo kale lamida kuwan online ka ah. Tusaale, dhamaan tobabarayaasha waxaa qasab ah in ay leeyihiin aqoon buuxdo ee warbixinta casharada. Sidoo kale, tobabarayaasha isticmaalaya agabka tiknoolajiyada ku saleysan badalkii is dhexgalka waji ka wajiga ee ayaa u baahan uqalmid dheeriya si guul looga gaaro. Xirfadahan dheeriga ama dhaqamadan ayaa gunaanudaya Warbixinta VII.

Qeyb walbo oo warbixina ayaa ka kooban dhowr u qalmid. Uqalmid walba ayaa lagu sharaxaya dhowr dhinac ee aqoonta iyo fahanka iyo sameynta iyo Isku-duubnida.

### Content Area I: Professionalism and Ethical Practices

- Models professional conduct
- Prioritizes cultural competence and equity
- Understands professional development/training within the context of early childhood and school age care
- Continually builds trainer knowledge and skills.

### Content Area II: Adult Learning Principles

- Fosters adult learning
- Uses reflection to promote growth.

### Content Area III: The Learning Environment

- Prepares for the training event
- Creates and sustains a welcoming, safe, and respectful environment
- Uses technology effectively.

### Content Area IV: Facilitating Learning

- Guides adult learning and training experiences
- Adapts delivery in response to participants
- Uses time effectively
- Maintains integrity of instructional plan
- Demonstrates knowledge of content.

### Content Area V: Assessing and Evaluating Training

- Evaluates training practices
- Assesses learner outcomes.

### Content Area VI: Instructional Design

- Develops content based on research and what is known about quality practices
- Uses principles of universal design to include all participants
- Utilizes a variety of learning/instructional strategies
- Aligns content and assessment to objectives.

### Content Area VII: Technology-based Learning

- Designs course and instructional materials to achieve learning objectives
- Facilitates course to create learner interaction and engagement
- Facilitates learner access to support.

## Kartida aqoonta tababaraha

Habraaca u qalmida ayaa loo kale qeybiyay labo heer. Dabeecadaha lagu qeexay qeybtan ku suntan 'Aqoonta iyo Fahanka' oo tilmaamaya ficillada muujinaya aqoonta, fahmidda, ama codsiga aad u aasaasi ah (sida "yaqaan," "isticmaalka," ama "muujinaya"). Dabeecadaha lagu tilmaamay qeybtan ku qoran 'Sameynta iyo Isku-Duubnida' waxay qeexayaan adeege horumarsan, oo qeexaya qoto dheer, oo badanaa, ama adeegsi gaar ah oo aqoonta u leh. Dhaqamadan ayaa inta badan qeexaya ficilada sida "sameya," "hababka," ama "muujinta."

### Nuxurka Aagga I: Dhaqamada Anshaxa iyo Xirfadlenimada

#### A. Habeeya dhaqanka xirfadeed

Kood hka	Aqoonta iyo Fahamka	Howgelinta iyo iskudhafka
I.A.1	Uu yaqaanno oo u hoggaansamaa xeerarka daryeelka carruurnimada hore, da'da dugsigiyo iyo heerarka xirfadeed.	Adeegsada aqoonta sharciyada ku saabsan xannaaneynta caruurta yar ee da'da dugsigiyo iyo heerka waxbarashada marka laga shaqeynayo kaalmeeyayaasha tababarka iyo kuwa tababaraya.  <b>Tusaale:</b> Dib u waafajiya warbixinada sharuucda ama heerarka, tusaale, "tani waa tusaale habraac qorshe wax barasho ee loo isticmaali karo kasoo bixida Heerarka Waalidka Ogaansho."
I.A.2	Qeexaya aqoonta anshaxa ee xirfadda iyo xaaladaha tababarka oo ay ku jiraan aqoonta Xeerka NAEYC ee Anshaxa iyo Dheeraadka ee Barayaasha Qaangaarka ah ee Carruurnimada Hore (ama qaybta dambe ee ay ansixiyeen NAEYC) iyo / ama Xeerka Anshaxa Ee Ururka Qaranka ee Dugsiga Kadib.	Sameya habab raaca anshaxa marka aad la shaqeyneyso tobararayaasha iyo maal geliyayaasha.  <b>Tusaale:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>• La xiriira warbixinta iyo shuruucda habraaca Anshax;</li> <li>• Muujiya masuuliyadaha anshax ee labo labeynta.</li> </ul>
I.A.3	Og xirfadeed, anshaxa, iyo heerarka sharci ee la xiriira joogtaynta qarsoodiga iyo asaasiga macluumaadka caruurta, qoysaska, iyo ka-qaybgalayaasha tababarka.	Codkara iyo habeyn kara sirta iyo xogta qaaska ee caruurta, qoysaska, iyo xubnaha tobararka.  <b>Tusaale:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Sheega in daraasoyinka kiis ay yihiin "qarsoodi"</li> <li>• Icticmaala "qarsoon" ama tusaaloyin la gediya</li> </ul>

<p><b>I.A.4</b></p>	<p>Fahansan xadka aqoontiisa iyo qibradiisa.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Fahansan qasaaraha horumarinta iyo tobabarida adayda isticmaala hababka iyo istaraatiijiyada aanan cadeynta laheyn</li> <li>● Fahansan qasaaroyinka iyo xadgudubka macquulka ah ee anshaxa ee si xun u dhigida warbixinta, ama tobabarada warbixinta iyo qeybaha uqalmida halkaas oo uu tobabarahu laheyn aqoon, xirfad, ama dhaqamo qibradeed ku filan.</li> </ul>	<p>Uwareejiya xubnaha ilaaha saxda ah ee warbixinta ama isha warbixinta.</p> <p>Sameya dabal tixraac ee ka jawaabida su'aallaha ama walaacyadooda ka qeyb qalayaasha.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Qirta marka uusan aqoon jawaabta su'aal la weyddiiyay</li> <li>● Isticmaala "keydin" ama iyo hababka kale ee lagu keydinayo walxaha la tixraacayo</li> <li>● U wareejiyo licensor (qof leysin leh) marka ay ku haboon tahay.</li> </ul>
<p><b>I.A.5</b></p>	<p>Fahmaya waajibaadka iyo shuruucda xirfadle.</p>	<p>Muujiya heer xirfadlenimo ayadoo waqti fiican ku imaanayo, isku hagaajinayo, uguna diyaar garowayo.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● U diyaar garoowa waqti hore is uu tobabarku ugu dhaco si wanaagsan</li> <li>● Sii daawada muuqaallada dhamaan waqti hore</li> <li>● Diyaariya, koobiyo, qeybiyaa imaanshaha tobabarka ka loo qabanayo ka hor.</li> </ul>
<p><b>I.A.6</b></p>	<p>Garanaya masuuliyadaha xirfadle iyo waajibaadka doorka tobabare.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Garanaya una hogaansan shuruucda heerarka anshax ee quseeya xuquuda koobiyenta iyo xadida shaqada qof kale</li> <li>● Garanaya sida si buuxda oo sax ah loogu soo xigto agabka lagu isticmaalayo waxbarashada.</li> </ul>	<p>Keydiya warbixin sax ah</p> <p>Waafaqsan habraac warbixinta iyo habraaca tobabarka deeq bixiyaha oo ay ku jirto shuruudaha waqtiyada iyo codsiyada qorsheynta warbixin.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Qaada liiska dadka joogo oo saxda ah marka loo baahan yahay</li> <li>● Isticmaala qaabab qiimeyn ama habraacyo deeq ee tobabarka</li> <li>● Raaca labiska la ogol yahay ee uu deeq bixiyaha tobabarka sameyay</li> </ul>

## B. Siinta mudnaanta dhaqanka kartida iyo sinnaanta

Kood hka	Aqoonta iyo Fahamka	Howgelinta iyo iskudhafka
I.B.1	<p>Garan kara muhiimada ay ku leedahay luuqada iyo dhaqanka iyo ficilada tobabarka.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Isticmaala luuqad loo dhan yahay</li> <li>● Isticmaala luuqadaha ilmaha</li> <li>● Iskaga fogaada erayada lasoo gaabiye iyo kuwa farsamo.</li> </ul>	<p>Isku dhex dhafa horumarinta is dhex galka haboon dhaqan ahaan, luuqad ahaan, iyo ka qeyb ahaanshaha dhaqamada warbixin ee tobabarka, dhaqamada iyo isdhexgalka ka qeyb qaatayaaha.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Isticmaala daarasado caruur kala duwan oo dib loogu eegayo kala duwanaashaha dhaqan ee qiimeynta dhaqan</li> <li>● Weydiiya in tobabaryaasha ay la wadaagaan tusaaloyin isku dhafa oo loo dhan yahay ee dhaqamadooda</li> <li>● Sharaxa erayada farsamo</li> <li>● Isticmaala tusaaloyin dhaqan ahaan ku haboon</li> <li>● Weydiista fasax ka hor inta uusan mawduuc yada xasaasiga ka hadlin.</li> </ul>
I.B.2	<p>Garan kara dibna u eegi kara qiimaha shaqsi, xirfadiisa, anshaxiisa iyo xumaantiisa (tusaale, lab iyo dhig, qoomiyadiisa, dhaqankiia, iyo/ama heerkiisa) si aad in badan uga war qabto si fiicana ula shaqeyso dadka kala suwan ee aad la shaqeyneyso.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Fahmayaa dabeecadda iyo astaamaha ku saleysan isnaceybka qoomiyadaha (Ethnocentrism) iyo sida aragtida qoymiyadaha ay saameyn ugu yeelan karto awoodda tababaraha ee ku hawlanaan, fahmo, iyo la xiriiraan ardayda</li> <li>● Fahmaya sida arrimaha la xiriira eexasho la'aanta iyo takoorku ay saameyn ugu yeelan karaan jawiga tababarka lagu tababarayo.</li> </ul>	<p>Muujinaya xushmad dhaqan ee shaqsiyaadka iyo tobabarka kooxaha ee uu xiriirka kaala dhaxeyo adigoo ka fogaanayo malooiyinka ka shaqeynaya fahanka fikradhooda sida uu dhaqankooda saameynta ugu leeyahay ayadoo loo fiirinayo dhaqamadooda.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Weydiiya su'aallaha furan (kuwa jawaabtodu koobneyn) badalkii aad iska bilaabi laheyd ra'yiga fikrad</li> <li>● Ku saleya wax barashada furnaan dadka oo dhana</li> <li>● Ka daacada qirashada marka uusan waxba ka aqoon dhaqanka dadka kale</li> <li>● Kamid tahay sinaanta, kala duwnaashaha, iyo isku dhafka qorshaha horumarinta xirfadlaha.</li> </ul>

<p><b>I.B.3</b></p>	<p>U hadla ama u dooda bulshooyinka aan sida fiican loogu adeegin ama aananba loo adeegin.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Og sida arrimaha kala duwanaashaha ay saameyn ugu leeyihiin casharad iyo isdhex galka tobababrka</li> <li>● Kala saarikara aragtiyada iyo xogta muhiimka ah ee ku saabsan dhaqan iyo kooxaha kale, kuna dari kara warbixinta ku haboon iyo tusaaloyinka marka tobabarka socdo.</li> </ul>	<p>Ku dara fikradaha qeybgalayaasha tababarka oo dhan ka qeybgalayaasha ku saabsan hab-dhaqameedkooda</p> <p>Soo xasuusiua ka-qaybgalayaasha inay tixgeliyaan waxqabadyada dhaqan ee saameyn ku leh carruurta iyo qoysaska ay u adeegayaan ee ka duwanaan kara iyaga</p> <p>Ka mas'uul ah ficilada eexasho la'aanta ah, xitaa haddii aan laga fiirsan, kana shaqeeya sidii loo dayactiri lahaa waxyeelada.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Waxaa ka mid ah hawlaha la xiriira qaadashada aragtida kullanka shaqooyinka tababarka</li> <li>● Qeexaya marka faham la'aanta ku saabsan kala duwanaanshaha ay ka dhalan karto khilaafaadka shaqsiyaad dhexdooda ah ee waxbarashada</li> </ul>
---------------------	--	---



Kood hka	Aqoonta iyo Fahamka	Howgelinta iyo iskudhafka
		<p>Qibrad u leh isticmaalana istaraatijiyado kala duwan ee lagu qiimeynayo laguna xalinaayo qilaafka</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Horumariya wada hadalka deegaanka waxbarasho ee qilaafka iyo niyad ahaan arrimaha bulsho ee kala duwan sida kula duwanaashaha qoomiyado, takoorka, iyo qiimeynta qaldan</li> <li>● Balaariya aqoontiisa dhaqan iyo bulshooyinka aan sida fiican loogu adeega, dadka la xaqiro ayadoo loo maraayo horumarinta xirfadle.</li> </ul>

**C. Fahmida horumarinta xirfadda dhinaca carruurnimada hore iyo/ama daryeelka iyo waxbarashada da'da dugsiga**

Kood hka	Aqoonta iyo Fahamka	Howgelinta iyo iskudhafka
I.C.1	<p>Muujiya fahan caruurta yar yar iyo/ama Xanaanada ardayda iskuulka gaartay sida ku qeexan siyaasadaha ku haboon, sharciyada , Heerar iyo aqoonta xirfadle.</p>	<p>Horumariya warbixinta horumarin ee ku haboon ee tobabarka marka lala shaqeynayo ardayda tobabarka.</p> <p>La kaashada qabiirada ku haboon meesha uusan aqoonta u laheyn.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Soo xigta tusaalooyinka Ogaansho ee Heerarka Waalidka si uu u sharaxo 'tayada sare' ee loo baahan yahay.</li> <li>● Isticmaala tusaaloyinka ECIP marka laga hadlayo heerarka wax barasho ama waxqabadka fasalka</li> <li>● U warejiya ardayda tobabarka wakiilo leysin leh in ay uuga jawabaan su'aallah qaaska ah</li> </ul>

<p><b>I.C.2</b></p>	<p>Muujiya fahansanaan ah shuruucda la xiriirta habraaca xirfad hormarineed ee ardayda yar yar iyo kuwa da'da iskuulka gaaray ee Minnesota.</p> <p>Si joogto ah uuga warqaba isbadala habraaca waxbarashada ee caruurta yar yar iyo xanaanada kuwa da'da iskuulka gaaray.</p>	<p>Bixin kara warbixin sax ah oo ku saabsan halka laga helayo xogta ku haboon ee casharada tobabaka iyo habraaca hormarinta xirfadlaha ardayda yar yar iyo kuwa da'da iskuulka gaaray ee Minnesota.</p> <p><b>Tusaale:</b> Kula taliya ka qeyb galka Ogaanshaha Waalida ku saleysan, fursadaha tobarada kale, ansaxinta, iwm. ee saxda ah kuna haboon tobabarka, tusaale, "Inkasto oo aanan heynin waqti ku filan oo aan si fiican ugu falaqeyno mawduucan isla waqtigan, waxaa jira fasal kale oo laga yaabo in aad rabi laheyd..."</p>
---------------------	---	--

I.C.3	Garan kara masuuliyadaha tobabaraha ah wakiilka u xilsaaran.	<p>Isticmaala xaaladaha kala duwan ee aqoonta iyo shaqada tobabarka ee isbadaleysa.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Ku caawiya ardayda in ay si codkara u dhigaan caqabadaha kusoo bixi kara si ay u badalaan dhaqamada ayna ugu helaan xal caqabadahan</li> <li>● U ogolaada waqti ay ku sameyaan ardayda qorshe howlgal ama ka go'naansho ay ku howl gelinayaan dhaqamo cusub.</li> </ul>
-------	--	---

#### D. Si joogto ah u dhiska aqoonta iyo xirfadaha tababaraha

Kood hka	Aqoonta iyo Fahamka	Howgelinta iyo iskudhafka
I.D.1	<p>Muujiya fahan iyo aqoon uqalmida looga baahan yahay shaqada caruurta yar yar</p> <p>Kawar qaba Qaab-dhismeedka Aqoonta ee Minnesota iyo Tilmaamaha Caruurta Yaryar ee Minnesota ee Horumarka (ECIPs) iyo Tilmaamayaasha Caruurta Iskuulka Gaartay ee Horumarka (SAIP).</p>	<p>Tusaale uuga dhiga aqoonta korriinka ilmaha, hababka ku habboon korriinka, iyo hababka xanaanada hore ee tayo sare leh iyo hababka waxbarashada ee ku saabsan mawduuca tababarka.</p> <p><b>Tusaale:</b> La xiriiriya casharada tobabarka uqalmida Qaab-dhismeedka Uqalmida Aqoonta ee Minnesota, Heerarka Qiimeynta Head Start, iyo/ama heeraka ansaxinta</p>
I.D.2	Muujiya fahanka qaab dhismeedkan iyo xirfadaha iyo aqoonta war qurxinta.	<p>Sii wada dhisida iyo adkeynta aqoontiisa iyo xirfadiisa ka tobabare ahaan ilaa bilaawga iyo heerka soconaayo ee horumaritna xirfadle</p> <p>Muujiya hogaamin dhanka horumarinta xirfadaha ee dadka kale.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Kasoo baxa shuruudaha socoda ee horumarinta xirfadlaha</li> <li>● Ka qeyb qaata indho indho indheynta, tobabarida ama cashar siinta</li> <li>● dhinca ka tobabarida (co-trains) ama tobabarayaasha kale marka la weydiyo.</li> </ul>

I.D.3	Raadiya kobcinta meelaha ay ku yar tahay aqoonta kana qeyb gala fursadaha hormarineed ee xirfadaha jira.	<p>Si joogto ah u isticmaala dib qiimeynta shaqsi asagoo muujinaya halka xirfadaha iyo aqoontu ka naaqus tahay qorshe dib talaabada xigta ee kobaca xirfadle.</p> <p>La wadaago aqoonta iyo khibradda asagoo ka qayb qaadanaya la talinta ama kuwa ku cusub doorka tababaraha.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Dhameystira qiimeynta shaqsi ee tobabaraha</li> <li>● Sameya oo heysta qorshe horumarinta xirfadle</li> <li>● Ka qeyb qaata cashar siinta ama tobabarida la xiriirta kobaca tobabare.</li> </ul>
-------	--	---

## Nuxurka Aagga II: Mabaadi'da Waxbarashada Dadka waaweyn

### A. Kobciya mabaadi'da waxbarashada dadka waaweyn

Kood hka	Aqoonta iyo Fahamka	Howlgelinta iyo iskudhafka
II.A.1	<p>Fahmaa aragtida iyo mabaadi'da barashada dadka waaweyn (andragogy) waxayna aqoonsan yihiin kala duwanaashaha ee doorbidida waxbarasho iyo awooda ay leeyihiin ardayda waa weyn ee wax barashada.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Leh aqoon istiraatiijiyad si ay diiradda u saaraan bartilmaameedyada, hawsha, iyo waqtiyada la dhisay gudahood ayadoo sidoo kale weli jawaab u ah baahida iyo walaacyada ardayda'</li> <li>● Aqoonsan kara shakhsiyaadka u fir fircoon waxbarashada iyo deegaankeeda, kuwaaso sameyn karaan qabsasho habboon oo ku saabsan maareynta dhaqdhaqaaqa shakhsiyadeed iyo kooxaba</li> <li>● La qabsan karo jadwalka wax barashada marka loo baahan yahay in laga soo baxo hiida ardayda tobabarka.</li> </ul>	<p>Isiticmaala howl fududeyno farsamo/xeelado loogu tala galay ardayda waa weyn iyo ayadoo shuruucda niyada lagu hayo.</p> <p><b>Tusaale:</b> Ilaaliya isku dheeli tirka howlaha joogtada ah iyo kuwa aan aheyn iyo hogaamina howl fududeyn iyo fududeynta waxqabad ay ardayda hormuudka u tahay.</p>

<p><b>II.A.2</b></p>	<p>Ka warqabo muhiimada ay leedahay dhisida qibrad ku saleysan dadka waawen aqoonta ka hor.</p>	<p>Ka raadsha warbixin deeq bixiyaha tobabarka qibradooda ardayda tobabarka ama isticmaala howla isbarasho si loogu qiimeyo ardayda qibradooda iyo heerka xaaladooda.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Weydiiya ardayda in ay la wadagaan qibradooda sannadle inta leys baranaayo</li> <li>● Weydiiya ardayda tobabarka in ay la wadaagaan warbixinta ku saabsan horumarinta shqadooda ee kooxaha yar.</li> </ul>
<p><b>II.A.3</b></p>	<p>Og aqoonta iyo xirfada hore ee ka qeyb qaatayaasha tobabarka.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Inta lagu guda jiro hordhaca mawduuca tababarka, tobabaraha waa inuu weydiinayaa, "Immisa qof oo idinka mid ah ayaa horay u isticmaalay nooc ka mid ah qorshe cashar ama liiska hawlaha la qorsheeyay?"</li> </ul>	<p>Isticmaala aqoonta hore ee ka qeyb qaatayaasha tobabarka wax qabadkiisa, tusaale, doodaha</p> <p>Bixiya tusaale cad oo sax ah kaaso la xiriira casharka ardayda ee qibrada nolaleed.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Ku dara tusaaloyin xalinaya da'da kooxada kala duwan</li> <li>● Ku dara tusaaloyin xalinaya dhibaaytoyinka ku saleysan qoyska iyo xarunta xanaano.</li> <li>● Xooga saara tusaaloyinka ay la wadaagaan ka qeyb qatayaasha ee shakadooda iyo qibaradahooda.</li> </ul>
<p><b>II.A.4</b></p>	<p>Ka warqabo danaha ardayda waaweyn ee qaadashada go'aan ee horumarinta xirfadle ama tobabarka.</p>	<p>Ku caawiya kaqeyb qaatayaasha in ay gartaan waxa ay ka faa'iidi karaan tobabarka</p> <p>Si cad u sharaxa fa'iidooyinka barashada qibrada iyo barashada wax cusub.</p> <p><b>Tusaale:</b> Ku xira qibrada wax barasho xaaldaa shaqada ama baahida ardayda tobabarka "Shaqadaada ayaa fududaaneyso marka aad awoodo..."</p>

<p><b>II.A.5</b></p>	<p>Fahamsan tahay qiimaha ay leedahay dejinta kalsoonida iyo dadka waawayn ee kala duwan u dulqaadashada khatarta marka la baranayo ama la isku dayo wax cusub.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Yaqaan hawlo kala duwan oo horudhac ah oo dhiirigelinaya bilaawga habka-howlaha ka qeyb galka iyo caawinta abuurista rajo deegaan waxbarasho wanaagsan.</li> </ul>	<p>Sameya fursado taagero ee ardayda waa weyn ay iskugu dayayaan xirfado cusub, tijaaboyin, iyo xitaa in ay si amaan ah u guul dareystaan ku dabaal dagaan ka weyb qalka.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Weydiiya isxil qaamayaasha in ay muujiyaan xirfado cusub</li> <li>● U ogolanayo tobabarayaasha inay indho indheyaan inta aysan ka qeyb qaadan waxqabad cusub</li> <li>● Aqbala faaniyana isku day kasta ayadoon la qiimeyneenin</li> <li>● La wadaago qibradiisa shaqsi marka xirfad cusub la baranayo.</li> </ul>
----------------------	--	--

<p><b>II.A.6</b></p>	<p>Abuura oo joogteeya ka qayb-qaadashada, taageerida, iyo jawi waxbarasho oo ammaan ah oo kor loogu qaadayo wax-barashada dadka waaweyn.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Garanaya habraacyo tobabar kala duwan oo waafaqsan habraaca xaaladaha ay aadka ugu haboon yihiin.</li> </ul>	<p>Istimaala habraacyo kala duwan oo lagu dhisayo waxbarasha rabitaan ee ka qeyb qaatayaasha</p> <p>Badala qorshaha qibrad sida loogu baahan yahay si loo waafajiyo baahida radayda tobabarka looguna taagero ka qeyb ahaanshaha ardayda cuuryaamiinta ah.</p> <p><b>Tusaale:</b> Isticmaala isku dar ah dib isku-eegis, doodaha kooxeed, muujinta shey, soo bandhigida, warbaahinta kala duwan, qalabka muuqaalka, daraaseynta kiis, iwm</p>
<p><b>II.A.7</b></p>	<p>Sharaxa faa'iidada dhageysi toos ah iyo waxqabad yada wax barashada waafaqsan shaqada ardayga tobabarka ku jira deegaankiisa iyo masuuliyadihiisa shaqo</p>	<p>Isticmaala habab si joogto ah uga qeyb galinaya ardayda horumarinta xirfadaha loo baahan yahay ee goobaaha shaqadooda iyo doorkooda.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Yareeya sharaxaadaha qudbad</li> <li>• adeegsanaya tusaalooyin ku habboon nooca daryeelka, kooxaha isku da'da, iwm.</li> </ul>
<p><b>II.A.8</b></p>	<p>Fahmaya doorka ku celcelinta waxbarashada.</p>	<p>U ogolaada waqti ku cel celin badan xirfadaha cusub ama waxqabadyada wax barasho.</p> <p>Dhiiro geliya isticmaalka xirfad cusub ee inta u dhaxeysa goobta shaqada iyo tobabarka.</p> <p>Fiiriya qimeynta isticmaalka.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Badala waqtiga tobabarka sida loogu baahan yahay ayadoo la horumarinayo xifdinta xirfadaha ka hor inta aan cashir kale loo gudbin</li> <li>• Xooga saaraya muhiimada isticmaalida xirfado cusub ee inta u dhaxeysa casharada isku daba xig xiga ee tobabarka.</li> </ul>

## B. Waxuu isticmaashaa milicsiga si kor loogu qaado kobaca

Kood hka	Aqoonta iyo Fahamka	Howgelinta iyo iskudhafka
----------	---------------------	---------------------------

<b>II.B.1</b>	Fahmaya waxa uu yahay dhaqanka dib uuga fikirka ee ku taageerida xubnaha isticmaalka waxa ay bareen.	Isku dhafa fursadaha dhaqamada dib u eegista, oo ay ka mid tahay waqti aamusnaan ah, inta lagalayo tobabarka.  <b>Tusaale:</b> <ul style="list-style-type: none"><li>● Ku dara waqtiyo yar oo ay xubnaha si dagan dib ugu milicsan karaan shaqsiyan ka hor inta aanan dooda la bilaabin ama wax qabadka</li><li>● Oo ay ku jirto dib u eegista iyo qorsheynta waqti ee gabagabada casharka.</li></ul>
---------------	--	---



<b>II.B.2</b>	Qiimeya xiriirka ka dhaxeya dib u eegista iyo isbadalka.	<p>Soo jeediya dib u tixraaca waxqabadyada la xiriira dib u eegista xubnaha</p> <p>Soo jeediya lasocoshada ku haboon, tobabarida, ama dhaqamada bulshooyinka lagu kaalmeynayo badalka dhaqankooda</p> <p>Habeynta ibadal dabci ku saleysan iyo dib u qiimeynta.</p> <p><b>Tusaale:</b> La wadaago tusaaloyinka waqtiyada markii dib isku eegista shaqsi ay keentay isbadal dhaqan.</p>
<b>II.B.3</b>	Xooga saara dib u eegista iyo qorsheynta inta lagu jiro tobabarka.	<p>Siiya waqti xubnaha ay ku qorsheyaan dhaqan gelinta fikradaha cusub.</p> <p>Siiya qorshooyin waxqabad ama agab kale oo lagu dhiiro gelinaya dhaqan gelinta fikradaha soo baxay inta dib u eegista la sameynaye.</p>

### Nuxurka Aagga III: Jawiga Deeganka Waxbarasho

#### A. Diyaariyaa dhacdada tababarka

Kood hka	Aqoonta iyo Fahamka	Howlgelinta iyo iskudhafka
<b>III.A.1</b>	Uqiimeya diyaar garowga in uu yahay halbowlaha guusha tobabarka.	<p>Isku keena agabka iyo waxyaabaha loo baahan yahay si tobabarku usocdo</p> <p>Sii saadalin kara kaalmoyinka loo baahan yahay in loogu daro dhamaan xubnaha.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Weydiin kara maalgeliya yaasha tobabarka luuqada looga baahan yahay xubnaha.</li> <li>● Soo aruurin kara warbixinta (sida loo heli karo) ku saabsan baahida goonida ee xubnaha.</li> </ul>

<b>III.A.2</b>	Imaada waqti hore oo ku filan si uu u diyaariyo meesha, agabka, iyo tiknoolajiyada ardayda waa weyn ee waxbarashada.	Hagaajiya Kuraasta iyo miisaska raaxo ee ardayda waa weyn - ka fog muuqalada, hoos u dhiga mashquuliska, iwm.  Ku diyaariya muqaalo iyo agab goobta ka hor inta aysan ardayda imaan.  Sameynta tijaabinta warbaahinta ka hor inta uusan tobabarka bilaaban
----------------	--	--

<b>III.A.3</b>	Ka warqaba muhiimada deegaanka iyo horumarinta waxbarashada ee kobaca xirfadlaha.	Sameya heshiis kala dhexeya xubanaha tobabarka ee ku saabsan tobabarka inta uu socdo iyo waxa laga filaayo (shuurucda tobabarka).  <b>Tusaale:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Udajiya sharci waqtiya bareega la aadayo</li> <li>● Kala hadla heshiiska waqtiyada la isticmaali karo taleefanka iyo wada sheekeysiga inta uu tobabarka socdo</li> <li>● Sameya heshiisyo ku saabsan ka qeyb qaadashada iyo waxa laga filaayo dhaqan ahaan ka qeyb qaatahaha.</li> </ul>
<b>III.A.4</b>	Soo saara walxaha deegaanka iyo agabka keeni kara caqabadaha ama xadidi kara ka qeyb qaadashada.	Dib iskugu hagaajin kara qaabka fadhi si boos looga soo saaro meeshana caqabadaha looga saaro  Badali kara waqtiga tobabarka, qaabka uu usocdo, ama waxyaabaha la qabanayo sida looga baahan yahay ka qeyb qaatayaasha.  <b>Tusaale:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Diyaariya turjumaano ama tujumaan toos ah sida loogu baahan yahay</li> <li>● Wax ka badali kara fadhiga si dadka cuuryaaminta ah is isticmaali karaan, dhagoolada, ama indhoolayaasha</li> <li>● Hubiya in muuqalada iyo maqalkuba ay qoraal leyihiin.</li> </ul>

### B. Wuxuu abuura oo ilaaliyaana jawi soo dhawayn, badbaado iyo ixtiraam leh

<b>Kood hka</b>	<b>Aqoonta iyo Fahamka</b>	<b>Howgelinta iyo iskudhafka</b>
<b>III.B.1</b>	Waqti hore yimaada si uuso dhaweyo xubnaha tobabarka qaadanaayo.	Dhameya diyaar garowga waqti kahore ka hor tobabarka si loo helo waqti lagula sheekeysto ka qeyb qaatayaasha inta ay imaanayaan  Isticmaala 'waqtiga tobabarka kahore' in uu iskugu keeno warbixinta ku saabsan aqoonta ka qeyb qaatayaasha iyo qibradooda, waxey daneenayaan, iwm.  <b>Tusaale:</b> Sameya sahmin cod qaad oo xubnaha inta ay imaanayaan.

<b>III.B.2</b>	Isbara nafsi ahaan  Siiya xog ku saabsan aqoonsigiisa qibrada casharka u leedahay iyo tobabarka	Siiya fursad ay xubnuhu isku salaamaan ayna isku bartaan.  <b>Tusaale:</b> Sii hadal bilaw marka la fadhiyo si aad u abuurto fursad wada hadal casharka ka hor.
----------------	---	---

<p><b>III.B.3</b></p>	<p>Qiimeya deegaan wax barasho oo xushmad ku saleysan</p> <p>Dajjiya hiigsiyo xushmadeed oo ardayda waaweyn deegaankooda wax barasho.</p>	<p>Ka warqaba sharciyada dhaqan ee saameynta ku leh xubnaha tobabarka.</p> <p><b>Tusaale:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Garan kara in xubnaha qaar ay door bidi karaan in ay indho indheyaan ka hor inta aysan ka qeyb qaadan waxqabad yada tobabarka.</li> <li>● Ka warqaba marka ay xubnuhu u baahan yihiin in ay bareeg aadaan si ay usoo tukadaan ama ay dhaqankooda wax ah u sameyaan.</li> </ul>
